# Macluumaadka ku saabsan daawada (lustgas)

Daawada lustgas in loo isticmaalo maandooriye ahaan ayaa caan ka noqotay dhalinyarada yaryar iyo dhalinyarada waaweynba. Dad badan ayaa u malaynaya in daawada lustgas aanay waxyeello lahayn, laakiin taasi run maaha. Qofka u isticmaalaya daawada lustgas ujeedooyin maandooriye wuxuu halis ugu jiraa dhaawacyo halis ah oo soo gaara habdhiska neerfayaasha iyo maskaxda.



Giftinformationscentralen
SWEDISH POISONS INFORMATION CENTRE

Länsstyrelserna

Folkhälsomyndigheten

LÄKEMEDELSVERKET
SWEDISH MEDICAL PRODUCTS AGENCY

## Waa maxay lustgas?

Lustgas waa daawo loo isticmaalo sida xanuun jebiye oo kale, tusaale ahaan xilliga dhalmada. Marka aanay daawada ahayn waa gaas loo isticmaalo inuu wax kiciyo kaas oo ku jira qasac laga soo buufinayo ama wax la mid ah.

## Maxaan u baahanahay in aan anigu ogaado?

Sannadihii la soo dhaafay lustgas waxay ku caan noqtay maandooriye lagu sakhraamo. Si fudud ayey dadka caadiga ahi gaar ahaan uga heli karaan dukaamada internetka. Waxa kale oo jira dukaamo online ah oo suuq geeya lustgas sida "maandooriyaha". Ma jiraan wax da' ah oo u xaddidan iyo sida loo gadayo lustgas sharciguna muu nidaamin. Dawladu waxay magacawday guddi baaritaan ku soo sameeya sida sharcigu u eegi doono isticmaalka lustgas marka aan daawo ahaan loo istimaalayn.

Lustgas waxaa lagu gadi karaa iyada oo ku jirta kartoono yaryar oo midabka qalinka oo kale leh iyo tayuubyo waaweyn. Gaaska waxaa inta badan si toos ah looga soo nuugi karaa kartoonka/tayuubka ama iyada oo laga buuxiyo buufin ay ku jirto daawada lustgas dibna laga soo nuugo buufinta. Daawada lustgas waxay qofka 1-2 daqiiqo siinaysaa sakhrad degdeg ah taas oo abuurta nasasho iyo qosol. Waxa kale oo uu qofku heli karaa xanuun jebin iyo dhalanteed.

Marka daawada lustgas si toos ah looga soo nuugo tayuubka gaaska ama buufinta, wuxuu qofku soo nuugayaa gaastii oo aan waxba lagu darin oo aan la qasin. Way ka duwan tahay daawada lustgas ee lagu isticmaalo daryeelka caafimaadka - waxa lagu qasaa ogsijiin waxaana bixiya shaqaale u tababaran daryeelka caafimaadka kuwaas oo xakameeya cadadkeeda iyo quwadeeda. In lagu isticmaalo daryeelka caafimaadka waa mid sidoo kale xadidan maadaama daawada lustgas la isticmaalo halmar isla markaana jirka iyo habdhiska neerfayaasha waxa la siiyaa wakhti ay dib ugu soo kabtaan.

## Waa maxay khataraha ku jirtaa?

- Mar kasta oo la isticmaasho daawada lustgas, waxaa kharibaysaa fitamiinka muhiimka ah ee B12 kaas oo looga baahan yahay si uu u dhiso unugyada dhiigga iyo ilaalinta xiddidada neerfayaasha. Khatarta ugu weyn ee isticmaalka daawada lustgas ayaa lagu arkaa inay soo noqnoqto maadaama aanu jirku helin wakhti uu ku soo kabto, taas oo ku keeni karta dhaawacyo khatar ah habdhiska neerfayaasha.
- Calaamadaha lagu gartaa waa luminta dareenka, kabuubyooyin iyo hoos u dhac xoogga oo ku yimaada faraha, gacmaha, gacmaha oo aanay faraha hore ku jirin iyo lugaha iyo sidoo kale qofka oo isku kaaja. Waxaa laga yaabaa inay qofka ku adkaato istaaga iyo socodku.
- Calaamadaha kale waa welwelka, cudurka dhimirka iyo dhibaatooyin xun oo dhinaca xusuusta ah oo la mid ah xusuusta oo ka sii darta. Waxay kaloo kordhisaa halista xinjirowga dhiigga.
- Daawada lustgas ee aan waxba lagu darin ama la qasin waa mid aad u qabow markay si toos ah uga soo baxdo tayuubka afkiisa markiiba - waxay ku dhowaan kartaa 100 digrii oo maynis ah waxayna dhaawacyo ku keentaa afka, hunguriga iyo marinnada hawada. Waxa laga yaabaa inay qofka ku adkaato inuu neefsado oo uu wax liqi karo wakhti dheer ka dib.
- Marka uu qofku nuugo daawada lustgas, ma qaadanayo wax ogsijiin ah. Markaa waxa laga yaabaa inuu qofku dareemo dawakhaad ama uu wakhti kooban suuxo. Marka uu qofku hawo dib u qaato, wuxuu qaadanayaa ogsijiin ku filan oo markaa ayey soo kabashadii si caadi ah ugu dhacaysaa si dhakhso leh.
- Dhimashada ku timaada isticmaalka daawada lustgas aad bay dhif u tahay laakiin way dhacdaa.

## Ma jiraan wax kale oo muhiim ah oo ay tahay in aan ogaado?

- Lama sheegi karo inta ay leeg tahay daawada lustgas ee uu qofku qaadan karo iyada oo aan khatar ku keenin – dadku way ku kala duwan yihiin. In badan haddii la isticmaalo, waxa sii badanaya dhaawacyada khatarta ah ee ay keenayso.
- Fikrad khaldan oo caadi ah ayaa oranaysa haddii la qaato fitamiin B12 dheeraad ah inay ku filan tahay oo aanay kugu dhacayn waxyeellooyinka ay keento daawada lustgas sida in lagu sakhraamo. Taasi run maaha – daawada lustgas waxay baabi'isaa fitamiin B12 dhammaantii, xitaa fitamiinada lagu kabo cuntada iyo cuntada waxa lagu bixiyo kaabista iyo cuntada.
- Ma jiraan wax si ka hortag ah loo samayn karo si daawada lustgas looga dhigo mid khatar yar u leh in la nuugo
- Haddii dhaawacyo u dhacaan sababo la xiriira isticmaalka daawada lustgas kuwaas oo soo noqnoqda, tallaabada ugu muhiimsan waa in la joojiyo isticmaalka daawada lustgas, oo ay weheliso baaritaan ay sameeyaan daryeelka caafimaadku.

### Maxaan samayn karaa haddaan ahayn qof weyn?

**Kala hadal dhalinyarada yaryar iyo dhalinyarada waaweyn ee nawaaxigaaga jooga khataraha isticmaalka daawada lustgas. Sidoo kale ka foojignoow haddii aad hesho weel uu gaas ku jiro ama buufinno.**

## Miyaad qabtaa su'aalo ku saabsan daawada lustgas?

Halkan waxaad ka heli kartaa talooyin iyo jawaabo ah su'aalo ku saabsan daawada lustgas iyo mukhaadaraad kale.

**Xarunta macluumaadka sunta** lambarka telefoonka 010-456 6700 ama bogga giftinformation.se/aktuellt/lustgas/ (websaydku waa iswiidhish)

**Kaantarool buuxa** – fullkoll.nu/ (websaydku waa iswiidhish)

**1177** – wac 1177 si aad uga hesho talo bixin daryeelka caafimaadka ama booqo bogga internetka 1177 in other languages – 1177

**112** – haddii xaaladdu degdeg tahay, wac 112 oo weydii macluumaadka sunta.
Macluumaad muhiim ah oo luqado kala duwan ku qoran – SOS Alarm